



# Maxaa ka dhiga goob barasho wanaagsan?

## Qaabaynta dhismuhu ma saameeyaa najaxa ardayda?

Dadka intiisa badan waxaa la isku raacsanyahay in macalinka wanaagsan uu yahay asaaska barashada. Iyadoo ay sidaa tahay maxay noqon kartaa goobta uu barahaashi waxa ku barayo? Cilmi baadhis baa soo jeedisay in tayada qalabka dugsiyada uu saamayn wayn ku leeyahay gudashada heerka akadeemiyadeed. Xaalada muuqa ee dugsiyada, da'da, qaabeynta goobta iyo tayada nidaamka dhismaha laga bilaabo qaboojinta iyo diirinta illaa xamaamaatka iyo korontada waxay saamayn balaadhan ku yeelan karaan heerka gudashada akadeemiyadeed:

- ▶ Daraasad lagu sameeyey dugsiyada sare ee Texas ayaa tilmaantay in dugsiyada lagu qiimeeyey xaaladaha ugu wanaagsan ay oga wanaagsanyihiin imtixaanka guud marka la barbardhigo dugsiyada xaaladaha ugu liita. Marka lagu daro, in lagu qiimeeyey heerka qalin jebinta ee dugsiyadaa kuwa ugu duqsan uguna xaalad liita ay noqotay oo keliya 4 boqolkiiba mid ka hosaysa marka la barbardhigo kuwa ugu cusub ama ugu xaalad wanaagsan xagga dhismaha (2008, UT/Austin)
- ▶ Daraasad ay samaysay South Carolina ayaa lagu ogaaday in nuqsanta dhismaha dugsiyada ay saamayso macalinka dabcigiisa, qaadashada iyo dayactirka; dabciga ardayga, iyo weliba caawinaada iyo hab-dhaqanka waalidka iyo bulshada. (2001, South Carolina Oversight Committee)
- ▶ Ardayda dhigta maalmu dhiman celceliska guud ee keena dhibco hoose imtixaanka guud ee dugsiyada New York ay un qayb ka tahay liidashada dhismayaasha dugsiyadaa. (2008, Journal of Environmental Psychology)

## Waa side xaalada qaabaynta iyo dhismayaasha PPS?


Inta badan dugsiyada degmada waxaa la dhisay ka hor dagaalkii II ee aduunka iyada oo loo qaabeeyey fasalo isku wada mid ah oo uu qaado midkiiba 30 arday. Qaabayntu waxa ay ka walax tahay fekirii waqtigaa ee in ardaydu ay kuligood baran karaan walax keliya, waqti keliya, iyo dariiqad keliya. Saaxadaha dhaadheer waxa ay tebayaan qaybo furan iyo goobo ay dadku kulmi karaan, ee sida guud waajjhi karta barashada.

## Khibrada dugsiyada PPS:


- ▶ Iyadoo ay aysan jirin tiro fasalo ah – Qolalka waawayn ee casharada illaa fasalada caadiga ah illaa goobo yaryar oo lagu qaybyo ardaydu – ayaa xadidaya hal-abuurka iyo ku filaanshaha shaqaalaynta iyo mashaariicada ardayda.
- ▶ Albaabo kala duwan oo laga soo galo iyo iyadoo ay aysan jirin nidaam badbaado oo danabaysan ayaa caqabad ku ah in ay howlwadeenadu illaaleeyaan cida soo galaysa ama ka baxayso dugsiyo dhowr ah.
- ▶ Iyadoo ay yartahay qaybaha korontada laga isticmaalo ayaa ka dhigaysa in ay xadidnaato tirada technology-ga ee ay ardayda iyo macalimiintu adeegsan karaan, kuwan oo sida badan loo adeegsado computer-ada iyo noocyada kale ee technology-ga.
- ▶ Inta badan macmalada iyo fasalada waxaa ku yar suxuunta loo adeegsado biyaha iyo keyd ku haboon agabka mashaariicda ee fasalka.

## Aragtida Macalimiinta:


PPS waxay waydiisay 70 macalin in ay qeexo qaybaha qaabaynta ee ugu haboon barashada. Here Waxay yidhaahdeen sidan:




Bii'ada



Barashada



Bulshada



Bii'ada

- ▶ Sida badan fasaladu waa kuleyl ama qaboow. Qaar waxaa ku yar nalalka caadiga ah ama marwaxadaha. Qaar dhulkaa ku yar. Marka lagu daro, dugsiyada qaar oo aaban lahayn kadin laga soo galo oo xagga soo dhawaynta ah iyo saaxadaha oo sida badan ay dhagxani ay taxakumaan.

## Waxyaabaha loo baahanyahay dugsiyada qarniga 21<sup>aad</sup>

Maanta dhaqaalaha dunidu waxa uu u baahanyahay xirfad sare iyo qalinjebiyayaan xalili kara, qiimeyn karaa islamarkaana kaydin kara marka lagu daro la xidhiidhka, halabuur, ikhtiraac iyagii oo si wadar iyo keli keli ahba ushaqayn kara.

Marka lagu daro, saynis yahanadu waxay imika garanayaan in ardaydu ay baran karaan siyaabo kala duwan - qaar baa adimada wax ka barta, qaar baa celceliska wax ku barta kuwaa itus oo itaabsii ku barta.

Nidaamka barida iyo heerka akadeemiyadeed waxa ay qayb ka yihiin in bandanna in ay gaadhaan baahida is-huwan ee goobaha shaqadda ee qanigan 21<sup>aad</sup>. Dhismayaasha dugsiyada waxay ka warbixin karaan xaaladaha cusub iyadii oo si gaadh ah loo barataarayo:

**Wadashaqayn:** Qolal yaryar oo daaqado leh oo ay suuragal tahay in ay macalimiintu kala shaqeeyaan kalana sheekaystaan baahida ardayda, lagula kulmo ardayda si khusuusi ah ama kooxo yaryar ama ardayda loogu diro daraasad khaas ah ama howl mashruuc.

**Bulshada:** Goobo ay suuragal tahay in ay waalidku iskaa wax uqabso ugu shaqeeyo ama wadaayada beeshu ay ugu nakhtiimin karaan ardayda, ay macalimiintu ku dhamaystiraan mashaariicdooda ama lagu qabto xafad dugsiyada bulshada.

**Suuragalnimada:** Goobo waasic ah oo kooxo kala duwan oo xagga barashadu ahu fadhiisan akraan iyadii oo ay jiri karaan dariiqad loogu qaybin karo qolalka goobo yaryar oo ay ardaydu ku gutaan mashaariicda shaqo ee dugsiyada.

**Technology-ga:** Nidaamka korontada iyo qaabaynta qol caawin kara adeegsiga technology-yad kala duwan ka bilow computer-adda nooca gacanta, kan aqalka, ilaa iyo kuwada xidhiidhka qalabka la iska eegto ee laba fasal ama goobaha shaqada ee gudaha magaalada ama dunida oo dhan.


## Talaabada xigta

Kooxda la talinta muwaadiniinta PPS waxay kula taliyeen gudiga dugsiyada bishii April in Bulshada Portland ay ka qayb galaan sanadka dhismayaal xidhiidh ah sanadaha soo socda si loo geg-tidho dhismayaasha dugsiyadeena. Dugsiyada degmada waa ay tixgelinaysaa talo soo jeedintaa.

## Ka Qayd Qaado

Ka soo qaybgal wada sheekaysiga. Kulamada bulshadu waa May 22, 23 iyo 24 kan oo ka dhici doona Roosevelt, Madison iyo Dugsiyada Sare ee Lincoln, Saacadu kolka ay tahay 5 galabnimo illaa 8 fidnimo. Macluumaad dheeri ah, booqo [www.pps.net](http://www.pps.net) ama [www.bit.ly/PPSBuildLearn](http://www.bit.ly/PPSBuildLearn) ama ka wac PPS Office of School Modernization 503-916-3817.

Si aad ola hadasho howlwadeenada kuugu adeega afkaaga hooyo fadlan wac 503-916-3586.




Bii'ada



Bii'ada



Dhaqanka



Barashada



Dhaqanka